

KULAN DHEX MARAY DANJIRAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYEED EE INDONESIA IYO GUDDOOMIYAHA GOLAHA SHUURADA INDONESIA



Maanta oo ay taariikhdu ahayd 5^{ta} Maarso 2009, waxaa kulan dhex maray Mudane Maxamuud Colow Barow, Danjiraha Jamhuuriyadda Soomaaliyeed ee Indonesia iyo Mudane Dr. M. Nur Hidayat, Guddoomiyaha Golaha Shuurada Indonesia; salaan iyo warbixin guud oo ku saabsan xaalada uu maanta wadanku marayo ka dib, ayuu Danjiruhu sharraxaad kooban ka bixiyay

baahida ah sidii ay gacan uga geysan lahaayeen Baarlamaanka Indonesia dib u dhiska iyo horumarinta Baarlamaanka Soomaaliyeed, dhinacyada hawlo maalmeedka Baarlamaanka (Sharciyada, doodaha iyo dhanka abuurista xisbiyo siyaasadeed) iyo tayaynta hawlwadeenadiisa.

Danjiruhu wuxuu sidoo kale ka codsaday Guddoomiyaha in uu gacan ka geysto sidii ay codkooda u gaarsiin lahaayeen Ururarrada Baarlamaanada sida: Baarlamaanka Adduunka (IPU), Baarlamaanka Wadamada Aasiyada fog (AIPO), Baarlamaanada Qaaradda Aasiya (APA), Midowga Baarlamaanada Islaamka (PUIC) iyo kuwo kale oo ay xubin firfircoon ka yihiin, si ay Baarlamaanka uga gacan qaabtaan baahida uu u qabo aqoon kororsiyo u sahlaysa hawlhooda qaran; iyadoo la tixgelinaayo duruurfta adag ee haystada Xubnaha Golaha Shacabka Soomaaliyeed iyo Hawlwadeenadooda.



Guddoomiyaha ayaa muujiyay sida uu uga xun yahay dhibka haysta umada Soomaaliyeed mudada dheer, wuxuuna hoosta ka xariiqay in ay tahay waajib diini ah tahay in gacan laga geysto hawlaha baaxada leh ee horyaala Baarlamaanka Soomaaliyeed oo ay haystaso dhibaatooyin

culus, isagoo talooyin wax ku ool ahna arrintaas ka bixiyay.

Shirkan oo ku soo beegmay xilli ay isu diyaarinayaan labada aqal Indonesia doorashooyinkii qaranka, ayaa haddana la filayaa in uu Guddoomiyuhu talooyinkiisa u gudbiyo Ururada Baarlamaan ee ay xubnaha ka yihiin.

Kulanka ayaa ku soo gebageboobay jawi wanaagsan oo laga dheehan karo horumar iyo wax qabad.

Jakarta 5^{ta} Maarso 2009

Safaaradda Jamhuuriyadda Soomaaliyeed ee Indonesia
Jl Salak No. 5, Guntur, Jakarta Selatan
Email: somaliemb@indo.net.id